



Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

# SIYAASADDA FAALLOOYINKA IYO CABASHOOYINKA

Siteembar 2015

NOOCA 1



## KOONTAROOLKA NOOCA

<b>NOOCA</b>	<b>LA SOO SAARAY</b>	<b>MUALIF</b>	<b>WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY</b>
1	Siteemb ar 15	G WINTER	I GORDON
1.1	Diseemb ar 20	G WINTER	I GORDON





## TUSMO

<b>TUSMO .....</b>	<b>1</b>
<b>SIYAASADDA FAALLOOYINKA IYO CABASHOOYINKA .....</b>	<b>2</b>
1. Ujeedka .....	2
2. Baaxadda .....	2
3. Waxyabo gaar ah oo la danaynayo.....	2
4. Magacyo inaan la xusin.....	3
5. Shaqaalaha hirgalinta siyaasadda .....	3
6. Sideen usoo gudbiyaa faallo ama cabasho? .....	3
6.1. Wax baddal ah.....	4
7. Baaridda Cabashada iyo Tillaaboooyinka Xiga.....	4
8. La tacaamulidda Faallooyinka.....	5
9. Siyaasadda kormeeridda iyo dib u eegidda siyaasadda .....	5



## SIYAASADDA FAALLOOYINKA IYO CABSHADA

### 1. Ujeedka

IDG waxaa ka go'an heerarka ugu sarreeya ee shaqada iyo habdhaqanka. Sidaasi markii la yeelayo, waxaan garawsannahay in macaamiisheena, mas'uuliyiinta iyo dadka aan isdhexgalka la samayno ayaguna ay ka faalloon karaan ama dabcan ay ka caban karaan shaqadeena.

Waxaan soo dhaweyneynaa wixii jawaabcelin ah, mid wanaagsan iyo mid xunba waxaana dooneynaa inaan u adeegsano xogtaan in si joogto ah aan wax ugu horumarino aana ku saxno wixii khaladaad ah ama aan ku horumarino heerarkeena.

### 2. Baaxadda

Siyaasaddaan soo socota waxay dejisaa habraaca shakhsiyadka iyo ururradu ay ku soo tebin karaan walaacyada ku saabsan:

- Habdhaqannada goobta shaqada ee aan anshaxa ahayn, halis badnaan kara ama geyru sharci ah
- Heerarka liita ee shaqada ama habdhaqanka
- Waxyabihii la soo jeediyo ee horumarka ku saabsan.

Intaas waxaa kaloo dheer, Siyaasaddaan waxaa loogu tala galay inay naga caawiso sidii aan ku garan lahayn halka aan shaqada si wacan u wadno iyo tillaabooyinka urur ahaaneed iyo kuwa shakhs ahaaneed ee u qalma in la aqoonsado:

- Tusaaleyaasha habdhaqannada goobta shaqada ee sida gaarka ah wax u caawiya, muhiimka ah, ah wax ku ool ama haddii kale lasoo dhaweynayo
- Skakhsiyadka tillaabooyinka ay qaadaan ee 'sare u kaca ama meel dheer gaara' kuwaasi oo u qalma in la aqoonsado
- Wixii si guud loo ogaproject ama fallooyinka awoodda noo siiya inaan wax sii horumarino.

### 3. Waxyaboo gaar ah oo la danaynayo

IDG waxaa ka go'an xirmooyinka gaarka ah ee mabaadiida haga ganacsiga, xirfadaha iyo habdhaqanka shaqaalaha. Waxaan gaar ahaan danaynaynaa wax kastoo walaacyo ah oo kuwaan soo hoos galaya:

#### **Anshaxaa Caalamiga ah**

[http://icoca.ch/sites/default/files/resources/ICoC\\_English.pdf](http://icoca.ch/sites/default/files/resources/ICoC_English.pdf)





## Is'haysiga Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay [Yacni Mid Ahaanshaha Caalamiga ah]

### 4. Magacyo inaan la xusin

IDG waxay soo dhaweyneysaa dhammaan wixii jawaabcelin ah, laakiin waxay ogsoon tahay in dad badan ay door bidaan inay u soo gudbiyaan wixii ay ogaadaan si aan la magacaabeyn, oo magacyadooda aan la xuseyn. Nidaamkeenu wuxuu u qaabeysan yahay inuu muujiyo arrinkaan sidiisa ayuuna u yahay mid aan magacyo xusin, marka dadka jawaabcelinta bixinaya waxaan siinaa awooddha ay ‘sidaasi ku xulan karaan’.

### 5. Shaqaalaha hirgalinta siyaasadda

Guddiga waxaa saaran mas'uuliyadda guud ee siyaasadda Shirkadda taasoo ku saabsan faallooyinka iyo cabashooyinka, laakiin wuxuu dad kale u dhiiba Sargaal La Igmaday (DO) mas'uuliyadda maalin ka maalin ee dusha kala socoshada iyo hirgalinteeda.

Mas'uuliyadda loogu tala galay dusha kala socoshada iyo dib u eegidda siyaasadda iyo talo bixinno wixii ah ee loogu tala galay isbaddal ururka dhexdiisa ah kaasi oo ka dhalanaaya baaritaano iyo cabashooyin soo hoos galaya siyaasadda waxay saaran tahay Guddiga.

IDG La Igmaday waa maareeye sare oo maareeya shirkadda weyn ee Kooxda IDG ee DMCC, Mr Nick Alistar-ones.

### 6. Sideen usoo gudbiyaa faallo ama cabasho?

Barta internetka ee IDG waxay bixisaa meel ku saabsan ‘Soo Gudbi Faallo’ oo kutaal bogga ‘Nala Soo Xiriir’. Xulashadaan markii aad xulato, waxaa lagu siin doonaa foom internetka dushiisa ah oo ay tahay in la buuxiyo. Foomku wuxuu kaa dalbayaa inaad ku dhigto xog aasaasi ah oo xoogaa ah oo aad uga hadlayso xaaladda faallada ama cabashada – laakiin **soo gudbinta xogtaan waa wax la yeeli karo ama la iska deyn karo**.

Muhiimadda ugu weyn ee qeybaan waa in faalladaada ama cabashada la qori karo ama la duubi karo. Foomka dhammaadkiisa waxaa ah xulasho aad ku bixinayso cinwaankaaga lagaala soo xiriiri karo haddii aad dooneyso inaad qorto – laakiin hadana, **soo gudbinta xogtaan waa xulasho ama la yeeli karo ama la iska deyn karo**. Haddii aad dooneyso inaad bixiso faahfaahinta kugu saabsan, waxaad sidoo kale xulan kartaa xulasho u baahan annagu inaan si toos ah uga soo jawaabno cabashadaada ama faalladaada anagoo isticmaalayna cinwaanka ama meesha lagaala soo xiriiri karo ee aad qortay. Haddii faallada ama cabashada loo soo gudbiyay si aan cidna la magac dhabin, tillaaboooyinka ay qaadeysyo IDG ee ay uga jawaabeyso arrinkaan adiga laguuma soo bandhigi doono, mana loo soo daabici doono si la wada arki karo.



## 6.1. Wax baddal ah

Haddii barta internetku aysan shaqeyneyn sabab kasto ha ku timaadee, ama aysan ahayn habkaaga aad door bideyso ee aad ku soo gudbinayso faallo ama cabasho, waxaan soo dhaweyneynaa emaillo lagu soo diri karo:

[comments@idg-security.com](mailto:comments@idg-security.com)

Cinwaanka emailka waxaa la socda Sargaalka La Igmaday ee IDG. Sidii foom internetka dushiisa ah looma helayo, marka waxaan soo jeedinaynaa in xogtaan la bixiyo – laakiin **tani waxay gebi ahaanba ku xiran tahay garashadaada**:

- Taariikhda
- Waqtiga
- Meesha
- Faallada dhacdada ee mudnaanta siisa cabashada/faallada
- Cinwaankaaga lagaala soo xiriiri karo
- Oraah ku saabsan in aad dooneysyo/ama aadan dooneyn inaad hesho jawaabcelin

Fadlan caddee in aad adeegsanayso Siyaasadda Faallada iyo Cabashooyinka oo qeex inaad bal dooneyso in aqoonsigaaga laga dhigo qarsoodi.

## 7. Baaridda Cabashada iyo Tillaabooyinka Xiga

IDG waxaa ka go'an inay u soo baarto cabashooyinka si buuxda, oo xaq ah, oo degdeg ah ahna qarsoodi haddii daruufuhu saamaxayaan. Kadib markii la helo cabasho, DO (ama qof kale oo matalaya) ayaa habeyn doona qabanqaabada loogu tala galay baaritaanka.

Dheerarka iyo baaxadda baaritaanka DO uu sameeyo waxay ku xirnaan doonaan maadada waxa lasoo bandhigayo ee lasoo qufayo. Tusaaleyaasha ugu badan, DO ayaa samayn doona qiimeyn hore oo ku saabsan waxyabaha lasoo qufayo ee daboolka laga qaadayo si loo ogado bal in ay jiraan sababo loo sameeyo baaritaan intii hore kasii qoto dheer ama bal in wixii daboolka laga qaaday durba la sixi karo ayadoo loo yeelayo jiheyn maareyn oo degdeg ah.

Haddii lagama maarmaan ay noqoto in baaritaan intii hore ka dheer la sameeyo, DO ayaa samayn doona baaritaan gudaha ah waxaana laga yaabaa inuu soo xusho oo meesha ku soo daro shaqaale takhasus gaar ah leh oo khibrad u leh ka shaqeysiinta habraacyada goobta shaqada ama khabir aqoon u leh maadada la baarayo.

Baaritaankaan waxaa uu ku soo gabagaboobi doonaa sidii loo go'aamin lahaa faahfaahinta cabashada waxaana lasoo jeedin doona tillaabada xigta ee la qaadayo. Tala soo jiidinta waxa kujiri karta tillaabooyin edbin ah, isbaddallo lagu samaynayo siyaasadda iyo habraaca, ama sida macquulka ah sidii daboolka loogaga qaadi lahaa oo loogu wargalin lahaa hay'adaha dawliga ah ee uu arrinku khuseeyo haddii loo baahdo.





Talo bixinta ayaa loo gudbin doonaan Guddiga si uu u ansixiyo. Guddiga ayaa intaasi kadib mas'uul ka noqon doona dusha kala socoshada qaadidda tillaaboooyinka ay ogolaadeen.

Haddii aad doorato inaad raadiso jawaabcelin ku saabsan faalladaada ama cabashadaada, DO ayaa email kusoo qori doona talo ku saabsan waxyaabihii la soo ogaaday intii baaritaanku socday iyo tillaaboooyinka la qaaday intaasi kadib.

## **8. La tacaamulidda Faallooyinka**

IDG ma fileyso ‘faallooyinka’ u baahan baaritaanka, inkastoo DO asagoo adeegsanaya garashadiisa uu dooran karo inuu baaritaan sameeyo.

Markii shakhsigaas. Rikoor ah faallo wanaagsan ayaa la galin doonaa galkiisa khaaska ah, oo IDG ayaa sidoo kale dooran kara inuu abaal gud lacag ah siiyo (yacni qaab dheeraad ah oo garasho ah). Markii siyaasad, habraac ama faallo ku saabsan urur la aqoonsado, IDG ayaa dooni doonta sidii loo xaqijin lahaa in loo hirgaliyo sidii inay tahay habdhaqanka ugu wanaagsan ayadoo la deegsanayo wax ka baddalidda siyaasadda, habraacyo shaqo, barnaamijyo tababar, jiheyn maareyn, iyo faahfaahinno kale oo dhanka shaqada ah sida amarrada Goobaha llaalada laga hayo, iwm.

## **9. Siyaasadda kormeeridda iyo dib u eegidda siyaasadda**

Siyaasaddaan waxay muujinaysaa habdhaqanka IDG ee Siteembar 2015.

DO oo la shaqeynaya Guddiga wuxuu mas'uul ka ahaan doonaa dib u eegidda siyaasaddaan asagoo ka eegaya dhanka sharciga iyo shaqada ugu yaraan sannadkiiba mar.

